Bedelada Shaqaalaynta

Haddii macamiilka uu qaato adeegaha shaqaalaynta loogu talogalay ugu yaraan sagaal bilood, waxay dooran karaan adeegaha kamid noqoshada bulshada.

Kamid noqoshada Bulshada waxay ku xiraysaa dadka qaba naafooyinka dadka kale ee jaaliyada ama bulshada deegaanka ah. Midaana waxay u oggolaanaysaa in ay xiriiro la sameeyaan dad kale oo ay isku dano yihiin. Adeegaha taakulaynta waxaa loo qoondeeyay si kalinimo ah waxayna ku caawin kartaa dadku in ay ku biiraan ururo, kaqayb qaataan ururo oona noqdaan xubno naadiga kamid ah. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah booqo www.dshs.wa.gov/dda/county-best-practices.

Maamulayaasha xogta kiiska ee Maamulka Naafonimada Koritaanka waxay ku caawin kartaa codsashooyinka loogu talogalay in laga saaro xeerka sagaalka-bilood.



Gobolka 1 Waqooyi
Spokane
1-800-462-0624

Gobolka 1 Koonfur
Yakima
1-800-822-7840

Gobolka 2 Waqooyi
Everett
1-800-788-2053

Gobolka 2 Koonfur
Seattle
1-800-314-3296

Gobolka 3 Waqooyi
Tacoma
1-800-248-0949

Gobolka 3 Koonfur
Tumwater
1-800-339-8227

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

DSHS 22-1463 SM (Rev. 9/19) Somali

Adeegaha Taageerada Shaqaalaynta

loogu talogalay Dadka waaweyn ee qaba Naafooyinka Koritaanka

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

Maamulka Naafooyinka Koritaanka

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada' (DSHS) Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA)

waxay siinaysaa taageero shaqaalayn dadka waaweyn ee u qalma. U qalmitaanka waxaa laga xadidaa dhinaca qiimeynta Maamulka Naafonimada Koritaanka ee qofka. Macaamiisha Maamulka Naafonimada Koritaanka waxay oggaan karaan nooca hay'adaha shaqaalaynta u qalma ee la heli karo iyo nooca adeegaha laga bixiyo tooska maamulahooda xogta kiiska. Ku habboonaan wanaagsan ayaa muhiim u ah guusha. Macaamiisha waxaa lagu boorinayaa in ay waraystaan hay'adaha la heli karo kadibna doortaan mida bixinaysa taageerada loo baahanyahay.

Waddada lagu helo Shaqaalaynta

Hoosta siyaasada gobolka Washington, dadka shaqaynaya ee da'doodu tahay 21 sanno illaa 61, waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin xubno qiimo ku leh gudaha bulshada kuwaas oo mudan in ay helaan shaqaalayn ay la jirto fursado horumarin ah. Waddada lagu helo shaqaalaynta waa waddada gaarka ah ee macamiilka ee uu shaqo ku raadiyo. Waxay ka bilaabmaysaa qorshe tixgelinaya ahdaafta shaqada, baahooyinka, iyo qaabka ugu wanaagsan ee lagu helo taageerada loo baahanyahay.

WADDADA lagu helo SHAQAALAYNTA waxaa kamid noqon kara:

QAADASHO
Kulan biloow ah oo lagu aruurinayo oona lagu wadaagayo macluumaad.

OGGAANSHO
Qaabka kusalaysan-qofka ee lagu barto waxyaabaha uu jecelyahay ama necebyahay macamiilka, shaqooyinka uu jecelyahay, ahdaafta iyo xirfadaha.

U DIYAAR GAROWGA SHAQADA
Hawlaha diyaar-u ahaanta shaqada sida tijaabo khibrad shaqo, taageero iskaada ah oo muddo-gaaban ah iyo tababar gaadiid.

SUUQ-GAYN
Aqoonsashada iyo ka hadlida shaqooyinka, dhisida xiriiro lala yeesho dadka loo shaqeeyo iyo horumarin shaqaalayn.

TABABAR SHAQO
Taageero loo baahanyahay si loo guto looguna fiicnaado goobta shaqada.

ILAASASHADA SHAQADA
Taageero loogu talogalay haysashada ama ilaasashada shaqada, in lala sameeyo xiriir wanaagsan qofka loo shaqeeyo, la aqoonsado fursadaha, laga xaajoodo kordhinta lacagta, dalacsiin iyo/ama dheefaha la kordhiyay.

Noocyada Adeegaha Taageerada Shaqaalaynta

Shaqaalaynta Qofka La taageeray
waxay ku caawinaysaa dadka shaqada raadinaya in ay helaan oona haystaan shaqada ah ama ka saraysa mushaarka ugu yar. Taageerada loogu talogalay fursad shaqaalayn iyo hurumarin shaqo waa mid ku salaysan baahooyinka qofka, danaha iyo awoodaha.

Shaqaalaynta kooxda la taageeray
waxay siinaysaa horjoogid iyo taageero la wadaagay oo joogta ah oo loogu talogalay labbo illaa sideed qof oo qaba naafooyin oona jooga goobta jaaliyada. Taageerooyinka waxaa loogu talogalay in ay horseedaan shaqooyinka qofka. Tusaalooyinka waxaa kamid ah nadiifin, qurxin ama shaqaalooyin kale.

Wixii ku saabsan macluumaad dheeri ah ee khuseeya dadka ku bixiya shaqaalaynta gudaha deegaanka ka fiiri Bogga Internetka Ee Raadinta Adeeg bixiyaha halkan:
www.statedata.info/washington/search

Bogga internetka waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan:

- Dadka taageero bixiyayaasha ugu wanaagsan
- Waxa la weydiinayo marka la dooranayo taageero bixiye
- Waxa ka dhigaya daryeel bixiye tayo leh

Xadidaada Saacadaha Taageerada

Tirada saacadaha taageerada la bixiyay waxaa laga xadidaa dhinaca heerka taageerada qofka iyo taariikhda mushaarka.

Heerarka Taageerada waxay dhacaan hoosta seddexdaan qaybood ee soo socota:

1. Heerka Darnaanta hooseeya waxaa loola jeedaa qof madax banaan oo ku nool jaaliyada dhexdeeda; midkaas oo u baahan taageero yar oo lagu caawiyo in uu helo shaqo ula xiriiro dadka kale si wanaagsan; oona ilaalin kara caafimaadkiisa shakhsiyeed iyo ammaankiisa wakhtiga intiisa baddan asaga oo aan u baahanin horjooge ama ilaaliye ka warhaya.
2. Heerka Darnaanta dhexdhexaadka ah waxaa loola jeedaa qof madax banaan oo ku nool jaaliyada dhexdeeda mar-mar; midkaas oo u baahan taageero shaqaalayn dhexdhexaad ah; oona awooda in uu ku ilaaliyo caafimaadkiisa iyo ammaankiisa gudaha jaaliyada muddo gaaban; una baahan kara xoogaa horjoogid ama ilaalin ah, tababar ama caawimaad jireed qayb ah midaas oo lagu caawiyo hawlaha jaaliyada.
3. Heerka Darnaanta saraysa waxaa loola jeedaa qof ugu baahan taageero gudaha jaaliyada marwalba si uu u ilaaliyo caafimaadkiisa iyo ammaankiisa; una baahan taageero weyn si uu u helo shaqo; wuxuuna u baahanyahay horjoogid joogta ah, tababar ama caawimaad jireed buuxa midaas oo lagu caawiyo hawlaha jaaliyada inta baddan ama marwalba.

Taariikhda Mushaarka waxaa lagu xadidaa lacagta qofka ka kasbaday sannadkii lasoo dhaafay. Taariikhda mushaarka waxaa loo qaybinayaa seddex qaybood:

1. Shaqaalaynta soconaysa: Macamiilka wuxuu kasbadaa lacag uu ka helo shaqo ah sagaalkii bilood ee sannadkii lasoo dhaafay.
2. Shaqaalayn la joojiyay/hadda ah: Macamiilka wuxuu lacag ka kasbadaa shaqo ah ugu yaraan hal bil oo sannadkii lasoo dhaafay ah.
3. Shaqo la'aan: Qofku ma shaqaynayo ama ma kasban lacag sannadkii lasoo dhaafay.

Intiiba uu qofku shaqeeyo muddo dheer, kasbado lacag oona barto shaqadiisa, intiiba aanan loo baahanin taageero shaqaalayn ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo:

www.dshs.wa.gov/dda